**Tix:** XGBGM/0025/20 **Tar:** 27 October 2020

**Ku: Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug Galmudug= Dhusamareb=**

**Ujeedo: Soo Gudbin Shuruuc uu Ansixiyey Golaha Sharci-dejinta DGGM**

**Mudane Madaxweyne,**

Iyada oo la tixraacayo warqadaadii sumadeedu aheyd Tix:XMGM/10/036 kuna taariikhaysneed 11/10/2020 kana timid Madaxweynaha DGGM u jeed-keeduna ahaa soo gudbin Hindise Sharciyeedyo ka yimid Golaha Wasiirada si Baarlamaanku uga guto Waajibkiisa Dastuuriga ah.

Golaha Sharci-dejinta DGGM ayaa ku Ansixiyey Kalfadhigiisa 2aad ee Sanadkaan 2020, Fadhiyadiisii 11, 12, 13 iyo 14, Shuruucda kala ah;

1 Sharciga Maareynta Deeganka Sharci LR:001. 18 October 2020.
2 Sharciga Hay'adaha Samafalka & Horumarinta aan Dawliga ahayn Sharci LR:002. 19 October 2020.
3 Sharciga Dhismaha Booliska Galmudug Sharci LR:003. 21 October 2020.
4 Sharciga Golayaasha Deeganka Dawladaha Hoose Sharci LR:004. 22 October 2020.

Mudane Madaxweyne adiga oo gudanaya Waajibkaaga Dastuuriga ah waxaan kusoo gudbinaynaa 4 taan Sharci ee kor ku xusan si aad ugu meel-mariso Xeer Madaxweyne, kadibna loogu soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

Naga guddon Mudnaan iyo Qaderin

Lifaaqa Shuruucdii Baarlamaanku

M.ne Dr. Maxamed Nur Gacal
Guddoomiyaha Baarlamaanka

JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA · DOWLAD GOBOLEEDKA SOMALIYEED EE GALMUDUG · FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA · GALMUDUG STATE OF SOMALIA

**SHARCI Lr.004** **Taariikh: 31/10/2020**

## ANSIXINTA SHARCIGA GOLAYAASHA DEEGAANKA DOWLADAHA HOOSE

### MADAXWEYNAHA D.G

**MARKUU ARKAY**: Qodobka 50aad farqadda 12aad ee Dastuurka Dowladda Galmudug

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 27aad ee Dastuurka D.G ee fidinta awoodda Maamul

**MARKUU ARKAY**: Warqadda Guddoonka Baarlamaanka Galmudug Tix: XGBGM/0025/20 ee 27 October 2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Golayaasha Deegaanka Dowladaha Hoose

**MARKUU TIXGELIYAY**: Baahida Galmudug ay u qabto Sharciga Golayaasha Deegaanka ee Dowladaha hoose

**Waxaa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan**:

**Qodobka 1aad:**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo, waxaa la ogolaaday ansixinta Baarlamaanka ee Sharciga Golayaasha Deegaanka Dowladaha Hoose

**Qodobka 2aad:**

Waxaa uu Xeerkaan dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha D.G saxiixo. Laga bilaabo marka la saxiixo waxaa la baabi'yay Sharci iyo Xeer kaste oo ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee D.G.

**Dhusamareb 31/10/2020**

**Madaxweynaha D.G**
**Axmed Cabdi Kaarie**

XAFIISKA MADAXWEYNAHA DOWLAD GOBOLEEDKA SOOMAALIYEED EE GALMUDUG · OFFICE OF THE PRESIDENT GALMUDUG STATE OF SOMALIA

# *JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA*

## DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

# SHARCIGA DAWLADAHA HOOSE EE DAWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG

**[SHARCI LR 004/2020]**

**October 2020**

## TUSMO


CUTUBKA KOWAAD: QODDOBO GUUD .... 4
Qodobka 1aad: Qeexid .... 4
Qodobka 2aad : Qaab dhismeedka Dawlad Gobaleedka Galmudug .... 5
Qodobka 3aad: Baahinta Maamulka Gobal lada iyo Degmooyinka .... 6
Qodobka 4aad: Shaqsiyadda Qaanuuneed iyo Madaxbannaanida Dawladaha Hoose .... 6
Qodobka 5aad: Darajaynta Degmooyinka .... 6
CUTUBKA 2AAD: DHISMAHA IYO XILALKA HAY'ADAHA DAWLADAHA HOOSE .... 7
Qodobka 6aad: Qaabdhismeedka Dawladaha Hoose .... 7
Qodobka 7aad: Muddo Xileedka Golayaasha Deegaanka .... 7
Qodobka 8aad: Tirada Xubnaha Golayaasha Deegaanka .... 7
Qodobka 9aad: Dhismaha Golaha Deegaanka .... 8
Qodobka 12aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Deegaanka .... 9
Qodobka 15aad: Xilka qaadista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka .... 10
Qodobka 16aad: Kala Dirista Golaha Deegaanka .... 11
Qodobka 17aad: Guddiga Joogtada ah ee Golaha Deegaanka .... 11
Qodobka 18aad: Guddiga Fulinta ee Dawladda Hoose .... 11
Qodobka 19aad: Xilalka Golaha Deegaanka .... 11
Qodobka 20aad: Hawlaha Golaha Deegaanka .... 12
Qodobka 21aad: Awoodaha Golaha Deegaanka .... 13
Qodobka 22aad: Hawlaha Guddiga Joogtada ah .... 14
Qodobka 23aad: Xilka Guddiga Fulinta .... 14
Qodobka 24aad: Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Deegaanka .... 14
Qodobka 25aad: Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Deegaanka .... 15
Qodobka 26aad: Go'aan qaadashada Gudoomiyaha .... 15
Qodobka 27aad: Gunnada Golaha Deegaanka .... 15
Qodobka 28aad: Guddiyada Tuulooyinka .... 16
Qodobka 29aad: Guddiyada daabyadaha .... 16
Qodobka 30aad: Guddi Hoosaadyada Golaha Deegaanka .... 16
CUTUBKA 3AAD: FADHIYADA IYO GO'AAMADDA GOLAHA IYO GUDDIYADDA .... 17
Qodobka 31aad: Fadhiyada Golaha Deegaanka iyo Guddiyadiisa .... 17
Qodobka 32aad: U yeerasho La taliyeyaal iyo xeeldheerayaal .... 17
Qodobka 33aad: Guntanka Fadhiyada .... 17
Qodobka 34aad: Guddoonshada go'aamadda .... 17
Qodobka 35aad: Hadalqoraallada Fadhiyada .... 17
Qodobka 36aad: Xeer-hoosaadka Golaha Deegaanka .... 18
CUTUBKA 4AAD: SHAQAALAHA DAWLADA HOOSE IYO XUQUUQDOODA .... 18
Qodobka 37aad: Shaqaalaha Dawlada Hoose .... 18
Qodobka 38aad: Xoghayaha Dawladda Hoose .... 18
Qodobka 39aad: Xilka iyo Awoodaha Xoghayah Dawlada Hoose .... 18
Qodobka 40aad: Xilka ka qaadista Xoghayaha Dawladda Hoose .... 19
Qodobka 41aad: Mushaharka iyo Gunnada Xoghayaha Dawladda Hoose .... 19
Qodobka 42aad: Shaqaalaha kale ee Dawladda Hoose .... 19

CUTUBKA 5AAD:  DAKHLIGA, KHARASHKA IYO XISAABAADKA DAWLADDA HOOSE ..... 20
Qodobka 43aad: Hantida Dawladaha Hoose ..... 20
Qodobka 44aad: Ilaalinta Shuruucda Maamulka Maaliyada iyo Xisaabaadka ..... 20
Qodobka 45aad: _Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ..... 20
Qodobka 46aad: Xisaab xirka Dawladaha Hoose ..... 21
Qodobka 47aad: Dakhliga Dawladaha Hoose ..... 21
Qodobka 48aad: Habraaca dejinta canshuuraha iyo Xuquuqaha ..... 22
Qodobka 49aad: Qabashada Dakhliga ..... 23
Qodobka 50aad: Kharash bixinta ..... 23
Qodobka 51aad: Baarista Miisaaniyadda Dawladaha Hoose ..... 23
Qodobka 52aad:  Lunsasho Hantida Dawladda Hoose ..... 23
Qodobka 53aad:  Xaqiijinta soo celinta hantida ..... 24
CUTUBKA 6AAD:  HESHIISYADA DAWLADDA HOOSE ..... 24
Qodobka 54aad:  Shuruudaha Gelidda Heshiisyada ..... 24
Qodobka 55aad: Qandaraas bixinta Dawladdaha Hoose ..... 24
Qodobka 56aad: Ciqaabta jebinta Sharcigaan iyo go'aamadda Dawlada hoose ..... 25
Qodobka 57aad:  Xaaladda kala Guurka ..... 25
Qodobka 58aad:  Xeer Nidaamiyaal lagu fulinayo Sharciga ..... 25
Qodobka 59aad:  Dhaqangalka Sharciga ..... 25

## CUTUBKA KOWAAD: QODDOBO GUUD

### Qodobka 1aad: Qeexid

Si waafaqsan Sharcigaan, dhammaan erayada soo socda waxa ay yeelanayaan micnaha mid kasta ku hor qoran:

1. Degmo : Waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah Gobal ka tirsan Dawlad Gobal eedka Galmudug lehna xudduud.
2. Dawlad Hoose : Waxaa loola jeedaa Hay'ad Dawladeed ee heer degmo oo lagu dhisay Sharcigaan iyo Xeer-nidaam yada kale lehna awoodaha iyo ujee ddooyinka uu dhigayo Sharcigaan.
3. Gobal : Waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah dhulka Dawlad Gobal eedka Galmudug kana kooban Degmooyin iyo tuulooyinba.
4. Gole Deegaan : Waxaa loola jeedaa Gole xubnihiisu soo doorteen dadweynaha Deegaanka ama ergo Mataleysa dadweynaha lehna Awoodaha Sharci-dejinta iyo fulinta heer degmo.
5. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka : Waxaa loola jeedaa Xubin Golaha Deegaanka ay u doorteen in uu noqdo Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ahna Duqa Magaalada iyo Guddoomiyaha Degmada.

6. Guddiga Joogtada ah : Waxaa loola jeedaa guddi xubnihiisu ka mid yihiin Golayaasha Deegaanka fulinayana hawlaha loogu xilsaaray Sharcigaan.

7. Guddoomiye Gobal : Waxaa loola jeedaa masuulka ugu sareeya Gobal ka wakiilna ka ah Dawlad Gobal eedka.

8. Go'aan : Waxaa loola jeedaa go'aan uu guddoonsado Golaha Deegaanka, guddiga joogtada ama Guddoomiyaha Golaha Deegaanka si waafaqsan Sharcigaan

9. Wasaaradda : Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib U Heshiisiinta ee Dawlad Gobal eedka.

10. Wasiir : Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta.

11. Xeer-dawladda hoose : Waxaa loola jeedaa Xeerarka uu soo saaro Golaha Deegaanka si waafaqsan Sharcigaan.

**Qodobka 2aad : Qaab-dhiska Gobalada iyo Degmooyinka Dawlad Gobaleedka Galmudug**

1. Si waafaaqsan Sharcigaan, Dawlad Gobaleedka Galmudug waxaa loo qaybinayaa Goballo iyada oo gobal waliba uu ka koobnaanayo Degmooyin, Tuulooyin iyo Daabiyado.
2. Xaduudaha, Gobal ladii iyo Degmooyinkii jiray wixii ka horeeyay 1991 waxaa lagu samaynayaa wax ka badalid iyada oo la eegayo baahida in la helo Degmaayin iyo Gobal o cusub.
3. Dhismaha Gobal lo iyo Degmooyin cusub ee Dawladda Gobal eedka waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne kadib soojeedinta Wasiirka, ansixinta Golaha Wasiirada iyo Baarlamaanka

**Qodobka 3aad: Baahinta Maamulka Gobal lada iyo Degmooyinka**

1. Nidaamka Dawladaha Hoose wuxa uu ku dhisanyahay baahinta maamulka sida uu dhigayo Qodobka 27aad ee Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug.
2. Dawladaha Hoose waa qayb ka mid ah Dawlad Gobaleedka Galmudug, waxa ayna fuliyaan howlaha sharcigaan u xilsaarayo.
3. Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dib u heshiisiinta ayaa u xilsaaran arrimaha siyaasadda, xiriirinta iyo kormeerka Dawladaha Hoose.
4. Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa u xilsaaran hubinta wada daganashaha Degmooyinka, Toolooyinka iyo Daabiyadaha ee bulshada deegaanka kahor dhismaha Golaha Deegaanka.
5. Wasaaradda arrimaha gudaha waa in ay samaysaa tirakoob dadwanye ee heer Gobal , Degmo, Tuulo iyo Daabiyad.

**Qodobka 4aad: Shaqsiyadda Qaanuuneed iyo Madaxbannaanida Dawladaha Hoose**

1. Dawladaha Hoose waa hay'addo is maamula lehna Shaqsiyad Qaanuuneed oo ay ku gudanayaan xilalka uu Sharcigaan u xilsaarayo.
2. Dawladaha Hoose waxa ay yeelan karaan astaan u gaar ah oo Golaha Deegaanka uu ansixiyo wasiirkuna oggolaado.
3. Dawladaha Hoose waxa ay yeelanayaan shaabad uu haynayo Xoghayaha Dawladda Hoose, waxa ayna sugnaanshaheedu sax noqonaysaa marka saxiixa Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ay saarantahay.
4. Dawladaha Hoose waxa u madax bannaan yihiin gudashada Xilalka uu Sharcigaan u xilsaarayo.

**Qodobka 5aad: Daraja-siinta Degmooyinka**

1. Degmooyinka waxa ay u qaybsamayaan Darajada A iyo B si waafaqsan Sharcigaan.
2. Magaala Madaxda Dawlad Gobal eedka Galmudug iyo dhammaan Magaalo Madaxyada Gobal lada kale waxa ay qaadanayaan daraja (A). Dhammaan Degmooyinka kale waxa ay qaadanayaan Darajada (B).
3. Degmooyinka waxaa darajada looga dhimmayaa ama loogu kordhinayaa kaliya marka la sameeyo qiimayn la xiriirta tirada dadka ku nool, heerka kobaca dhaqaalaha iyo heerka bixinta adeegyada bulshada ee Degmada.
4. Darajo dhimmidda iyo kordhinta ku xusan Faqradda 3aad ee Qodobkaan waxaa lagu soo saarayaa Xeer Madaxweyne kadib marka uu soo jeediyo Wasiirka ansixiyaanna Golaha Wasiiradda.

5. Magaala Madaxda Dawlad Gobaleedka Galmudug waxaa lagu maamulayaa Sharci gaar ah oo uu soo saaro Golaha Baarlamaanka Dawlad Gobaleedka Galmudug kadib markii uu saxiixo Madaxwaynuhu.

## CUTUBKA 2AAD:DHISMAHA IYO XILALKA GOLAYAASHA DAWLADDA HOOSE

### Qodobka 6aad: Qaab-dhismeedka Golayaasha Dawladaha Hoose

Dawladaha Hoose waxa ay yeelanayaan qaab-dhismeedka soo socda:

a) Gole Deegaan oo heer degmo ah;

b) Guddiga Joogtada ah ee Golaha Deegaanka;

t) Guddiga Fulinta ee Dawladda Hoose; iyo

j) Guddi hoosaadyo, Guddiyo Tuulooyin iyo Guddiyo Daabiyado oo hoos yimaada Golaha Deegaanka.

### Qodobka 7aad: Muddo Xileedka Golayaasha Deegaanka

1. Muddo Xilleedka Golaha Deegaanka waa afar sano (4) oo ka billaabaneysa maalinta loo dhaariyo xilka.
2. Golayaasha Deegaanka ee muddo xilleedkoodu dhammaado waxa ay si xilgaarsiin ah u sii haynayaan xilka una gudanayaan waajibaadkooda illaa iyo inta lagu dhawaaqayo Natiijada Doorashada ee Golaha Deegaanka cusub.
3. Golaha Deegaanka ee xilgaarsiinta ah ma geli karo heshiisyo, ma bixin karo hanti dawladda hoose leedahay marka laga reebo qarashka joogtadda ah, mana qori karo ama eryi karo shaqaale ka tirsan dawlada hoose.
4. Ma bixin karo qandaraasyo, dallacaad shaqaale iyo qorshe dhul-bixin

### Qodobka 8aad: Tirada Xubnaha Golayaasha Deegaanka

1. Tirada Xubnaha Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka leh Darajada (A) waa 27 Xubnood.
2. Tirada Xubnaha Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka leh Darajada (B) waa 21 Xubnood.
3. Haweenku waa in ay noqdaan Soddon boqolkiiba 30% tirada guud ee Xubnaha Golaha Deegaanka si waafaqsan Qodobka 5aad ee Dastuurka Ku meelgaarka ee Dawlad Gobaleedka Galmudug.

### Qodobka 9aad: Dhismaha Golaha Deegaanka

1. Golaha deegaanka Degmooyinka Dawlad Gobal eedka Galmudug wuxa uu ku imaanayaa Doorasho dadwayne waxii ka danbeeyo mudo xileedkaan.
2. Mudo xileedka 1aad ee Dawladaha hoose qabashada doorashada Golaha Deegaanka waxaa lagu dhisayaa habraaca soo socda:

a) Wasaraada oo kaashanaysa Gudiga arimaha gudaha Baarlamaanka ayaa abaabulaysaa Shirweyne heer degmo ah kaasi oo la isugu keenayo Odayaal Dhaqameedyada Beelaha wada degga Degmada

b) Odayaal dhaqameedyada, iyagoo latashanaya Xildhibaanada Dawlad Gobaleedka Galmudug ee deegaan doorashadoodu tahay degmada, waxa ay soo xulayaan Ergo doorata Golaha Deegaanka;

t) Wasaaraddu waxa ay xaqiijinaysaa isku dheelitirnaanta ergada iyada oo loo fiirinayo beelaha wada degga Degmada;

j) Tirada Ergada dooranaysa xubnaha Golaha Deegaanka ee Degmada lehna darajada (A) ugu badnaan waa boqol iyo konton (135) ergo halka tirada Ergada dooranaysa Xubnaha Golaha Deegaanka ee Degmada lehna darajada (B) ay noqonayso ugu badnaan boqol (105) ergo;

x. Wasaaradda iyo Gudiga Arimaha gudaha ayaa u xilsaaran xaqiijinta in ergadu ka koobnaato qeybaha kala duwan ee bulshada si isu dheellitiran;

kh) Qabsoomidda iyo korjoogtaynta doorashada Golaha Deegaanka waxaa leh Wasaaradda iyo Gudiga Arimaha Gudaha Baarlamaanka

d) Qofka loo soo xulayo ka mid noqoshada eragada waa in uu buuxiyaa shuruudaha ku xusan faqradaha (b), (t) iyo (x) qodobka 12aad ee Sharcigaan.

### Qodobka 10aad: Dhaarinta Xubnaha Golaha Deegaanka

Xubnaha Golaha Deegaanka ee la doortay waxaa lagu dhaarinayaa si waafaqsan Qodobka 41aad, faqradiisa 1aad ee Dastuurka Dawlad Gobaleedka Galmudug Soomaaliya, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Gobal ka ama Garsoorihii kale oo uu u igmado.

### Qodobka 11aad: Kormeerka Guud ee Baarlamaanka Galmudug

Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Dib u hishiisiinta Baarlamaanka Dawlad Gobaleedka Galmudug ayaa wakiil uga ah Golaha Baarlamaanka kormeerka iyo Xaqiijiinta dhismaha Golayaasha Deegaanka.

## Qodobka 12aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Deegaanka

1 Qofka loo dooranayo xubinnimada Golaha Deegaanka waa in:

a) Uu yahay muwaadin u dhashay Dawlad Gobaleedka Galmudug, dhimirkiisu dhanyahay, da'diisu aysan ka yarayn Shan iyo Labaatan (25) Sano;

b) Uusan gelin dambi ay Maxkamadi ku xukuntay in uusan qaban Karin xafiis dawladeed;

T) Uu leeyahay ugu yaraan aqoon dugsi sare ama waayo arragnimo u dhiganto.

2. Wasaaradda ayaa ka xaqiijinaysa musharax walba in uu buuxiyay Shuruurdaha ku xusan faqrada 1aad ee Qodobkaan.

3. Qofka kasta oo loo doorto xubin ka mid ah Golaha deegaanka waxaa waajib ku ah in uu diiwaangeliyo dhammaan hantida uu leeyahay ha ahaato hanti guurto ah ama ma guurto ah ka hor inta uusan xafiiska qabanin.

4. Xoghayaha Dawlada Hoose ayaa u xilsaaran kaydinta iyo ilaalinta diiwaanka hantida xubnaha Golaha Deegaanka ee la doortay.

## Qodobka 13aad: Waayidda Xubinnimada Golaha Deegaanka

1. Shuruudaha lagu lumiyo xubinnimada Golaha Deegaanka waa:

b) Geeri ama caafimaad daro keenta in mudanuhu gudan karin waajibaadkiisa;

t) U Gudbin Istiqaalad qoraal ah Golaha Deegaanka;

j) jebidda Shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay Mudanaha;

x) Golaha Deegaanka oo cod saddax meelood laba meel ah (2/3) ku erya xubinta si joogto ah u jebisa Xeer-hoosaadka Golaha;

kh) Abuuridda ama ka qayb qaadashada hawlo lid ku ah Nabadgelyada iyo Xasiloonida Dawlad Gobal eedka;

d) Ka maqnaanshaha golaha labo kalfadhi oo isku xiga sabab iyo cudurdaar maangal ah la'aantood.

r) Maxkamadi ku xukunto xukun ciqaab oo kama dambays ah; ama

s) Qabasho Xil dawladeed oo kale.

2. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka ayaa si ugu wargelinaya Gudoomiyaha gobalka kursiga ku bannaanaaday mid ka mid ah sababaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan si loogu soo saaro Xeer Wasiir oo ku dhawaaqaya bannaanaashaha kursiga.

3. Kursiga bannaanaday waxaa lagu buuxinayaa isla habraaca ay xubintii bannaysay kursiga ku timid.

## Qodobka 14aad: Doorashada Guddoomiyaha Golaha Deegaanka iyo ku xigeenkiisa

1. Golaha Deegaanka waxa ay iska dhex dooranayaan Guddoomiyaha Golaha Deegaanka iyo guddoomiye ku xigeen fadhigiisa koowaad.

2. Inta laga dooranayo Guddoomiyaha Golaha waxaa shirguddoominaya xubinta ugu da'da weyn Golaha.

3. Codaynta Doorashada Guddoomiyaha iyo ku xigeenkiisa waa qarsoodi.

3. Codayntu waxa ay noqonaysaa saddax (3) wareeg oo u dhacaysa sida soo socota:

b. Wareega koowaad waxaa ku guulaysanaya xilka Guddoomiyaha musharaxa hela cod aqlibayad seddex meelood laba meel (3/2) ah ee tirada guud ee Golaha Deegaanka. Hadii musharaxa uusan helin cod aqlabiyad ah waxaa loo gudbayaa wareega labaad.

t) Wareega labaad waxaa ku tartamaya saddaxda (3) musharax ee hela codka ugu tirada badan wareega kowaad. Hadii ay jiraan musharaxiin wada helay cod isla'eg kana mid ah musharaxiinta ugu codka badan wareega kowaad waxa ay u wada gudbayaan wareega labaad.

j) Wareega labaad waxaa ku guulaysanaya xilka gudoomiyaha musharax hela cod (50%+1) ah ee tirada guud ee xubnaha Golaha. Hadii uusan musharaxna helin cod (50%+1) ah waxaa loo gudbayaa wareega saddaxaad. Hadii ay jiraan musharaxiin wada helay cod isla'eg wareega labaad kana mid ah kuwa ugu codadka tirada badan; waxa ay u wada gudbayaan wareega saddaxaad.

x) Wareega saddaxaad waxaa ku guulaysanaya xilka Guddoomiyaha musharaxa hela codka ugu tirada badan.

kh) Haddii wareega kowaad isugu soo haraan laba musharax oo kaliya; waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareega saddaxaad ee ku xusan xarafka (x) ee Faqradaan, waxaana guuleysanaya musharax ugu codka badan.

4. Ku xigeenka Guddoomiyaha Golaha waxaa lagu dooranayaa isla habraaca lagu doortay Guddoomiyaha Golaha Deegaanka.

**Qodobka 15aad: Xilka qaadista Guddoomiyaha Golaha Deegaanka**

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka waxaa xilka looga qaadi karaa marka ay soojeediyaan saddax meelood hal meel (1/3) ee tirada guud ee xubnaha Golaha una codeeyaan seddex meelood laba meel (3/2) ee tirada guud ee xubnaha Golaha.

2. Hadii soojeedinta xil ka qaadista laga keeno Guddoomiyaha; waxaa Golaha Shir guddoominaya gudoomiye ku-xigeenka. Hadii laga keeno soojeedin xil ka qaadis guddoomiyaha iyo ku-xigeenkiisa; waxaa shir guddoominaya Golaha Xubinta ugu da'da weyn.

### Qodobka 16aad: Kala Dirista Golaha Deegaanka

1. Golaha Deegaanka waxaa lagu kala diri karaaa shuruudaha soo socda oo kaliya:
    b) Haddii uusan qabsoomin kal-fadhiyada Golaha Deegaanka muddo saddax billood ah (3) iyada oo aysan jirin daruufo diidaya qabsoomidda kal-fadhiga ee Golaha Deegaanka;

    t) Hadii uu Golaha Deegaanka gudan waayo xilalkiisa sida ku xusan Sharcigaan iyo Shuruucda kale ee Dawlad Gobaleedka; ama

    j) Hadii 20% ee muwaadiniinta deggan degmada una diiwaangashan codbixiyeyaal ay codsi qoraal ah oo saxiixan u gudbiyaan Wasiirka kuna dalbanayaan in la kala diro Golaha Deegaanka.

2. Marka la helo shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee qodobkaan, Wasiirka ayaa u soojeedinaya Madaxweynaha in uu kala diro Golaha Deegaanka islamarkaana lagu magacaabo Xeerka Madaxweyne ee lagu kala dirayo Golaha Deegaanka Guddi ka kooban todobo (7) qof oo fuliya xilalka Golaha Deegaanka inta laga dooranayo Gole deegaan oo cusub muddo saddax billood (3) gudohood ah.

### Qodobka 17aad: Guddiga Joogtada ah ee Golaha Deegaanka

Guddiga Joogtada wuxa uu ka koobanyahay Guddoomiyaha Golaha Deegaanka, Ku-xigeenkiisa iyo Guddoomiyeyaasha Guddi hoosaadyada Golaha Deegaanka iyo Xoghayaha Guud ee Maamulka Dawlada hoose.

### Qodobka 18aad: Guddiga Fulinta ee Dawladda Hoose

Guddiga Fulinta ee Dawladda Hoose wuxa uu ka koobanyahay Guddoomiyaha Golaha Deegaanka, ku xigeenkiisa iyo Xoghayaha Dawladda Hoose.

### Qodobka 19aad: Xilalka Golaha Deegaanka

Golaha Deegaanka si waafaqsan Sharcigaan waxa ay yeelanayaan xilalka soo socda:

1. Matalaada iyo u adeegidda danaha dadweynaha deegaanka;
2. Noqdo mid ay la xisaabtamaan dadweynaha degmada iyagoo si joogta ah ugu warbixinaya waxqabadkooda shaqo deegaan doorashadooda ay matalaan;
3. Dhiiragelinta iyo xaqiijinta ka qaybgalka dadweynaha hawlaha Golaha Deegaanka iyo abuuridda dareen lahaansho oo ku aadan Maamulka Dawladaha Hoose;
4. Dejinta siyaasado lagu xaqiijinayo gudashada hawlaha iyo ujeedooyinka loo dhisay Dawladaha hoose;
5. Bixinta adeegyo dadweyne ee Sharcigu u oggolyahay;
6. Qoondaynta dhaqaale ku filan fulinta hawlaha Dawladaha hoose;

7. La shaqaynta maamulka Gobalka iyo wasaarada Arimaha gudaha si waafaqsan sharcigaan iyo shuruucda kale ee Dawlad Gobal eedka Galmudug,
8. in wadashaqayn buuxda la yeeshaan Dawlad Gobaleedka si loo hubiyo dhowridda Sharciga iyo xasilloonida guud loona gaaro maamul hagaagsan oo u daneynaya dadweynaha.
9. Ka shaqeeynta nabadda iyo xalinta qilaafaadka dagmada , toolooyinka iyo daabiyadaha hoos yimaada

**Qodobka 20aad: Hawlaha Golaha Deegaanka**

Dawladaha hoose waxa ay qabanayaan hawlaha soo socda:

1. Dhisidda iyo hawlgelinta Dugsiyadda Qur'aanka iyo Dugsiyada Hoose iyo horumarinta ku dhaqanka Diinta Islaamka;
2. Bixinta, dhowridda iyo hawlgelinta adeegyada guud sida biyaha, korontada, gaadiidka dadweynaha iyo adeegyada kale ee Dadweynaha loogu talagalay;
3. Kormeeridda hay'adaha gaarka loo leeyahay ee bixiya adeegga dadweyne inta dawlada hoose ka yeelanayso awoodda bixinta adeegyada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkaan;
4. Kormeeridda waxqabadka hey'adaha aan dawliga aheyn ee ka hawl gala degmada
5. Dhismaha, horumarinta iyo dhowridda bilicda magaalada sida waddooyinka, beeraha iyo goobo dadweynaha ku nastaan, wax ku akhristaan isuguna yimaadaan;
6. Dhismaha iyo maamulka guryo dadweyne oo deegaan loogu talagalay;
7. Dhismaha iyo maamulka Maktabado dadweyne;
8. Nidaaminta arrimaha waddo marista ee Magaalada si waafaqsan Sharciga Waddo marista ee Dawlad Gobal eedka;
9. Dhismaha iyo horumarinta hawlaha ilayska magaaladda;
10. Dejinta naqshadaha degsiimada ee Magaalada;
11. Dhismaha goobo biyo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda;
12. Nidaaminta dhismooyinka cusub, kuwa la cusboonaysiinayo iyo kuwa u baahan in la dumiyo;
13. Daryeelka iyo dhowridda caafimaadka guud ee dadweynaha iyo deegaanka;
14. Dhismaha iyo maamulka xarumaha xannaanada hooyada iyo dhallaanka;
15. Dhismaha iyo maamulka dugsiyada xanaanada caruurta;
16. Daryeelka xoolaha iyo ugaarta, horumarinta beeraha iyo ka faa'iidaysiga nacfiga dhirta iyo kalluunka;
17. Bixinta shatiyada ganacsiga;

18. Ka hortagga abaaraha, nabaadguurka, fatahaahada wabiyada, halista dabka iyo dhibaata kasta oo halis ku ah dadweynaha iyo deegaanka;
19. Daadguraynta dadweynaha haddii ay aafo dhacdo;
20. Horumarinta wax soo saarka deegaanka iyo abuuridda ilo dhaqaale;
21. Aasaasida suuqyo badeeco, xoolo iyo kalluunka;
22. Diyaarinta iyo fulinta mashaariicda lagu horumarinayo dadweynaha iyo deegaanka;
23. Diiwaangelinta dadweynaha degmada iyo kaydinta diiwaannadda dhalashada, dhimashada, guurka iyo furiinka;
24. Kaydinta Diiwaanka codbxiyeyaasha degmada;
25. Sahminta iyo naqshadaynta Magaalada iyo diiwaangelinta lahaanshaha dhulka ee Dadweynaha Degmada;
26. Abuuridda adeeg xogeed ama xog juqraafiyadeedka Degmada;
27. Samaynta iyo fulinta ganacsi loogu adeegayo danaha dadweynaha;
28. Horumarinta fanka iyo ciyaaraha;
29. Ku dhiiragelinta bulshada inay si iskaa wax u qabso ah ku horumariyaan deegaanadooda; iyo
30. Nidaaminta arrimaha qubuuraha iyo duugista ee Degmada.
31. Ilaalinta iyo ku dhaqanka shareecada islaamka iyo ka hortigidda munkaraadka.

**Qodobka 21aad: Awoodaha Golaha Deegaanka**

Golaha Deegaanka, si uu fuliyo xilalka iyo hawlaha ku xusan qodobadda 19aad iyo 20aad ee Sharcigaan, wuxa uu awood u leeyahay:

1. Diyaarinta iyo ansixinta Miisaaniyadda Dawladda Hoose;
2. In uu bixiyo kharashka lagu fulinayo hawlaha Dawladda Hoose;
3. Ka shaqaynta iyo horumarinta nabadda iyo dib u heshiisiinta iyo in khilaafaadka dadweynaha deegaaanka lagu xalliyo hab nabadaysan;
4. Soo saarista iyo dejinta xeerar lagu fulinayo hawlaha Dawladaha hoose kana hor imaanayn Sharcigaan iyo Xeer Nidaamiyeyaasha lagu soo saaro si waafaqsan Sharcigaan iyo Shuruucda kale ee Dawlad Gobal eedka;
5. in uu xaqiijiyo uruurinta canshuuraha, ganaaxyada iyo wixii xuquuq kale ah oo Sharcigaan ama shuruuc kale ay siinayaan Dawladda Hoose iyo dakhli kasta oo ka yimaadda hawlaha ay qabato Dawladda Hoose;
6. la wareegidda hanti dan-guud iyada oo la dhowrayo Faqradda 2aad ee Qodobka 26aad ee Dastuurka Federaalka iyo Dastuurka Dawlad Gobal leedka Galmudug;

7. In uu kormeero, baaro iyo adeegsado awood kasta oo sharciga oggolyahay si loo xaqiijiyo habsami u socodka hawlaha Dawladaha Hoose; iyo
8. In uu yeesho hanti, galo heshiisyo, soo oogo dacwad laguna soo oogi karo dacwad.

**Qodobka 22aad: Hawlaha Guddiga Joogtada ah**

1. Guddiga joogtada wuxa uu fuliyaa dhammaan hawlaha Golaha Deegaanka muddada u dhaxaysa kal-fadhiyada Golaha Deegaanka.
2. Guddiga joogtada ah waxa ay awood uleeyihiin go,aan ka gaarista howlaha dagdaga ah.
3. Guddiga Joogtada ah wuxa uu u bandhigayaa Golaha Deegaanka dhammaan hawlaha uu qabto muddada u dhaxaysa kal-fadhiyada si Goluhu u ansixiyo.

**Qodobka 23aad: Xilka Guddiga Fulinta**

Xilka Guddiga fulinta Golaha Deegaanka waa: -

1. Fulinta hawl maalmeedka maamulka ee Degmada
2. Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha Degmada.
3. Fulinta Xeerarka, iyo Go’aamada iyo amarrada ka soo Fula guddiga joogtada Golaha Deegaanka Degmada iyo Wasaaradda.
4. Diyaarinta iyo ku dhaqanka Miisaaniyadda.
5. Diyaarinta, fulinta iyo kormeeridda qorshayaasha horumarineed ee Degmada iyo u soo bandhigidda Golaha Deegaanka si loo ansixiyo
6. Diyaarinta warbixinno ku saabsan waxqabadka dhinaca fulinta ee dawladda hoose iyo u soo hordhigidda Golaha Deegaanka iyo Gudidga joogtada hadba sida ay noqoto.
7. Qorsheeynta, soojeedinta shaqaalaha dawladda hoose iyo kala cadeeynta shaqadooda si waafaqsan sharciga shaqqalaha rayadka.

**Qodobka 24aad: Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Deegaanka**

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka waa sarkaalka ugu sareeya Maamulka Dawlada hoose, wuxa uuna leeyahay Xilalka iyo awoodaha soo socda:
   - b) Wuxa uu matalaada Dawlada Hoose si sharci ah;
   - t) Wuxa uu Isugu yeeraa, shir guddoomiyaa fadhiyada Golaha Deegaanka iyo Guddiga joogtada ah;
   - j) Wuxa uu Saxiixa waraaqaha rasmiga ah ee ka soo baxa Dawladda Hoose;
   - x) Waa Madax Laamaha Amniga ee Heer Degmo;
   - kh) Wuxa uu isku xiraa arrimaha Siyaasadda, dhaqaalaha, bulshada ee Dawladda Hoose iyo Dawlad Gobal eedka;

d) Isku duwidda, hagidda iyo kormeeridda Taliyeyaasha Ciidamada Amniga ee heer degmo si loo ilaaliyo loona xaqiijiyo nidaamka iyo Amniga Degmada.

2. Hadii ay timaado baahi degdega ah suurtagalna ahayn in la isugu yeero Golaha Deegaanka ama Guddiga Joogtada ah; Guddoomiyaha, isagoo la tashanaya ku-xigeenadiisa, wuxa uu qaban karaa hawlaha, addeegsan karaa awoodaha Golaha Deegaanka iyo Guddiga Joogtada.

3. Guddoomiyuhu waa in uu soo hordhigaa Golaha Deegaanka shirkooda ugu horreeya go'aannada uu gaaray ee ku saabsan arrimaha ku xusan Faqradda 2aad ee Qodobkan si loo ansixiyo.

4. Haddii Golaha Deegaanka ansixin waayo go’aanadda uu gaaray guddoomiyaha si waafaqsan faqradda 2aad ee qodobkaan, go’aannadaasi waxa ay noqonayaan waxba kama jiraan oo ka billaabanaysa xilligii la soo saaray.

**Qodobka 25aad: Xilka Guddoomiye Ku-xigeenka Golaha Deegaanka**

1. Tirada Guddoomiye Ku-xigeenada Golaha Deegaanka waa hal (1) oo keliya.
2. Guddoomiye Ku xigeenka wuxa uu qabtaa hawlaha uu u igmado Guddoomiyaha, wuxa uuna xilka guddoomiyaha qabtaa marka uu guddoomiyuhu ka maqanyahay Degmada ama uusan gudan karin xilkiisa.

**Qodobka 26aad: Go’aan qaadashada Gudoomiyaha**

Gudoomiyaha golaha deegaanka ayaa qaadanaya go’amadiisa kadib markii uu katala galiyo ku xigeenkiisa.

**Qodobka 27aad: Gunnada Golaha Deegaanka**

1. Guddoomiyaha Golaha Deegaanka iyo Ku-Xigeenkiisa waxa ay yeelanayaan Gunno billeed iyo Guno xilleed uu Goluhu ansixiyo.
2. Xubnaha kale ee Goluhu waxa ay yeelanayaan Gunno billeed iyo gunno fadhi uu Goluhu ansixiyo.
3. Xubnaha Golaha Deegaanka markay u baxayaan Safar shaqo rasmi ah oo Degmada ka baxsan waxa ay leeyihiin gunno safar uu Goluhu go’aamiyo.
4. Dhammaan gunnooyinka ku xusan faqradaha 1aad, 2aad, iyo 3aad waxaa lagu soo saarayaa Xeer Dawladaha hoose iyada oo marwalba la tixgelinayo awoodda dhaqaale ee Dawladda Hoose.
5. Wasiirka wuxa uu leeyahay awood uu ku baabi’iyo xeerarka lagu soo saaray gunnooyinka ku xusan faqradda 4aad haddii aysan Dawladda Hoose bixin Karin dhaqaale intaas la ‘eg.

6. Haddii uu Wasiirka baabi’iyo xeerarka lagu soo saaray Gunnooyinka ku xusan faqradaha 4aad; wuxa uu soo saarayaa Xeer Wasiir oo lagu xadaynayo Gunnooyinka ku xusan Qodobkaan iyada oo la tixgelinayo faqradda 4aad ee Qodobkaan.

**Qodobka 28aad:Guddiyada Tuulooyinka**

1. Gudoomiyaha Golaha Deegaanka waxuu qaban qabinayaa/diyaarinayaa dhismaha gudiyada toolooyinka iyo daabiyadaha kadib soo jeedinta gudiga jogtada ah.
2. Beelaha deggan tuulada waxa ay labadii sanaba mar soo dooranayaan GuddigaTuulada oo aan ka badnaan karin toddoba xubnood.
3. Guddiga Tuulada waxa ay iska dhex dooranayaan Guddoomiye, G/ku-xigeen, Xoghaye, iyo qasnaji iyada oo uu goobjoog ka yahay Guddiga Joogtada ee Golaha Deegaanka si u xaqiijiyo in ay doorashadu u dhacday si xor ah oo xalaal ah.
4. Guddiga fulinta tuulada waa Gudoomiye , Gudoomiye Ku xigeen iyo Xoghaye
5. Golaha deegaanku waxa ay xeer hoosaad kooda wax kabdal ugu samayn karaan muda xileedka tuulooyinka iyo daabiyadaha .
6. Gudomiyaha tuulada warbixin joogta ah ayuu siinayaa golaha deegaanka 7aad kasta

**Qodobka 29aad: Guddiyada daabyadaha**

1. Gudoomiyaha Golaha deegaanka waxuu u magacaabayaa Daabiyadaha:
   - A Gudoomiye
   - B Gudoomiye ku xigeen
   - C Xoghaye
2. Guddiga Daabiyadaha waxa ay hoos tagaan Gudoomiya Golaha Deegaanka.
3. Gudomiyaha daabiyadda waxuu warbixin joogta ah siinayaa gudoomiyaha golaha deegaanka 7aad kasta.
4. Qiimaynta daabiyadaha iyo tuulooyinka waxaa lagu cadeynayaa xeer hoosaadka golaha deegaanka.

**Qodobka 30aad: Guddi Hoosaadyada Golaha Deegaanka**

1. Wasaaradu iyada oo la tashanaysa Gudiga arimaha Gudaha ee baarlamaanka waxa ay soo saarayaa Xeer Wasiir oo lagu nidaaminayo dhismaha iyo waajibaadka shaqo ee guddi hoosaadyad Golaha kaas oo ka caawinaya Golaha gudashada xilalkiisa.
2. Golaha Deegaanka wuxa uu dhisayaa guddi xaafadeed uga soo warbixiya xaaladda deegaanka.

## CUTUBKA 3AAD: FADHIYADA IYO GO'AAMADDA GOLAHA IYO GUDDIYADDA

### Qodobka 31aad: Fadhiyada Golaha Deegaanka iyo Guddiyadiisa

1. Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Deegaanka waxaa xaddidaya Wasiirka, waxaana la qabanayaa soddon cisho (30) gudahood oo ka billaabanaysa maalinta lagu dhawaaqo natiijada doorashada.
2. Fadhiyada kale ee Golaha Deegaanka iyo Guddiyada waxaa isugu yeeraya Gddomiyaha Golaha Deegaanka ama marka ay codsadaan saddax meelood meel (1/3) xubnaha golaha.
3. Golaha Deegaanka iyo Guddiyada Tuulooyinka waa in ay kulmaan saddaxdii billoodba mar iyada oo muddada kal-fadhigu tahay labaatan cisho (20).
4. Guddiga Joogtada ah iyo Guddi hoosaadyada waa in ay kulmaan ugu yaraan laba mar bishiiba.
5. Fadhiyada Golaha Deegaanka iyo kuwa Guddiyada waxa ay noqonayaan kuwa u furan dadweynaha hadii uusan Golaha ama Guddiga go'aansan si kale oo lagu qorayo hadal qoraalka fadhiga.

### Qodobka 32aad: U yeerasho La taliyeyaal iyo xeeldheerayaal

Golaha Deegaanka, Guddiga Joogtada ah iyo Guddi hoosaadyada waxa ay fadhiyadooda ugu yeeri karaan aqoonyahanno iyo la taliyeyaal kala taliya gudashada hawlaha u xilsaarayo Sharcigaan kana qaybgali kara doodaha hasa ahaatee aanan lahayn xaq codeyn.

### Qodobka 33aad: Guntanka Fadhiyada

Fadhiyada Golaha Deegaanka, Guddiga Joogtada ah, Guddi hoosaadyada iyo Guddiyada Tuulooyinka waxa ay ku furmayaan marka la helo guntan kaas oo ah kala bar lagu daray hal ee tirada xubnaha guud.

### Qodobka 34aad: Guddoonshada go'aamadda

1. Haddii si aan si kale loogu sheegin Sharcigaan, go'aamada Golaha waxa ay ku ansaxayaan kala bar lagu daray hal tirada xubnaha fadhiya shirkaas.
2. Ka hor inta aan la codeyn, shir guddoonka waa in uu hubiyaa jiritaanka guntanka fadhiga.

### Qodobka 35aad: Hadalqoraallada Fadhiyada

1. Dhammaan soojeedinada ku saabsan xeer-dawladda hoose iyo soojeedinada kale ee la horkeenayo Golaha ama Guddiyadiisaba waa in lagu diiwaangeliyaa hadal-qoraalka.
2. Magacyada xubnaha jooga, kuwa maqan iyo dadka aan xubnaha ka ahayn ee lagu martiqaaday shirkaas (Goobjoogayaal) waa in lagu diiwaan galiyaa hadal-qoraalka Golaha.

3. Hadal-qoraalka iyo go’aamada ka soo baxa shirkaas wuxa uu goluhu ku ansixinayaa isla fadhigaas ama kan xiga waxaana wada saxiixaya Guddoomiyaha Golaha ama Guddiga iyo Xoghayaha Dawladda Hoose.
4. Golaha Deegaanka waxa ku waajib ah inay daweynaha u soo bandhigaan go’aamada ay gaaraan iyaga oo ku dhejinaya goobaha loogu talagalay ogeysiinta iyo hab kasta oo kale oo dadweynaha lagu gaarsiin karo.
5. Golaha Deegaanka waa in uu nuqul ka mid ah hadal qoraalkiisa u gudbiyaa Wasiirka ama Guddoomiyaha Gobal ka toddobo cisho (7) gudohood.
6. Xoghayaha Dawlada Hoose ayaa mas’uul ka ah kaydinta dhammaan qoraallada la xiriira kulamada Golaha iyo Guddiyada.

### Qodobka 36aad: Xeer-hoosaadka Golaha Deegaanka

Golaha Deegaanka wuxa uu soo saarayaa Xeer-hoosaad lagu ilaalinayo nidaamka iyo habsami u socodka hawlaha Golaha iyo kuwa Guddiyadaba xilliga ay yeelanayaan fadhiyo kaasi oo aan ka hor imaanayn Sharcigaan iyo Xeer nidaamiyeyaasha lagu fulinayo Sharcigaan.

## CUTUBKA 4AAD: SHAQAALAHA DAWLADA HOOSE IYO XUQUUQDOODA

### Qodobka 37aad: Shaqaalaha Dawlada Hoose

Xoghayaha Dawladda Hoose iyo Shaqaalaha hoos imaanaya isaga ayaa u xilsaaran fulinta dhammaan siyaasadaha iyo xeerarka ay dejiyaan Golaha Deegaanka ee waafaqsan Sharcigaan iyo shuruucda kale ee dawlad gobal eedka.

### Qodobka 38aad: Xoghayaha Dawladda Hoose

1. Xoghayaha Dawladda Hoose waxaa soo magacaabaya Wasiirka.
2. Xoghayuhu wuxa uu shuruuda ka mid noqoshada golaha deeegaanka kala mid yahay xubnaha kale ee golaha deegaanka.
3. Xoghayaha waa in uu haystaa Shahaado Jaamacadeed.
4. Xoghayaha Fulinta waa Sarkaalka ugu sarreeya Waaxyaha Maamulka ee Dawladda Hoose.

### Qodobka 39aad: Xilka iyo Awoodaha Xoghayah Dawlada Hoose

Xoghayaha Dawladda Hoose wuxa uu u xilsaaran yahay:

1. Fulinta sharciyada u degsan maamulka Dawladda Hoose iyo awaamiirta Guddoomiyaha Golaha Degaanka;
2. Habeynta miisaaniyadda Dawladda Hoose, qaadida iyo uruurinta canshuuraha iyo xuquuqda kale ee Dawladda Hoose;
3. Xafidaadda iyo ilaalinta kharashka iyo dakhliga miisaaniyadda Dawladda Hoose;
4. Fulinta mashaariicda;

5. Isku duwidda, hagidda iyo kormeerista hawlaha waaxyaha iyo waxqabadka shaqaalaha Dawladda Hoose;

6. Sugidda, Dabagalka iyo ilaalinta hantida Dawladda Hoose;

7. U gudbinta Golaha Deegaanka iyo Guddiga Joogtada ah warbixin dhammaystiran seddaxdi billoodba (3) mar kuna saabsan waxqabadka waaxyaha dawlada hoose;

8. Hubinta waraaqaaha iyo saxiixyada lacag bixinta iyo lacag qabashada ee loogu talagalay socodsiinta hawl maalmeedka maamulka degmada;

9. Keydinta qoraallada iyo dokumentooyinka kale ee Golaha Degaanka, Guddiga Joogtada ah iyo Guddi hoosaadyada; iyo

10. Hawlihii kale u xilsaaro Sharcigaan, Golaha Deegaanka ama Guddoomiyaha Golaha.

**Qodobka 40aad: Xilka ka qaadista Xoghayaha Dawladda Hoose**

1. Xoghayaha Dawladda Hoose waxaa xilka ka qaadi kara wasiirka kadib marka uu helo soojeedinta Guddiga Joogtada ee Golaha Deegaanka.

2. Wasiirka marka uu helo go’aanka Guddoomiyaha Golaha Deegaanka uuna hubiyo soo jeedinta guddiga joogtada ah waxaa waajib ku ah in uu kow iyo labaatan cisho (21) gudahood xilka kaga qaado Xoghayaha islamarkaana ku magacaabo Xoghaye cusub isla wareegtada uu xilka uga qaadayo Xoghayaha la soojeediyay xilka qaadistiisa.

**Qodobka 41aad: Mushaharka iyo Gunnada Xoghayaha Dawladda Hoose**

1. Mushaharka Xoghayaha Dawladda hoose waxa uu la mid noqonayaa kuna salaysnaanayaa darajooyinka shaqaalaha Dawlad Gobaleedka sida uu dhigayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka.

2. Gunnada Xoghayaha Dawlada hoose waxaa go’aaminaya Golaha Deegaanka.

3. Mushaharka iyo Gunnada Xoghayaha Dawlada hoose waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Dawladda Hoose

**Qodobka 42aad: Shaqaalaha kale ee Dawladda Hoose**

1. Qorista, dallacsiinta, darajo ka dhimista, ergaynta, anshaxmarinta iyo shaqo ka eryidda agaasimeyaasha, Madax qaybeedyada iyo shaqaale weynaha kale ee Dawladda hoose waxaa lagu nidaaminayaa Xeer Shaqaalaha Dawladdaha Hoose oo uu soo saarayo Wasiirka.

2. Agaasimeyaasha Waaxyaha, Madaxda Qaybaha iyo Shaqaalaha Dawladda Hoose waxa ay maamul ahaan hoos imaanayaan Xoghayaha Dawladda Hoose

3. Mushaharka iyo Gunnooyinka Agaasimeyaasha, Madaxda Qaybaha iyo Shaqaalaha kale waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Dawladda Hoose.

4. Qorista shaqaalaha ayadoo loo eegayo awooda miisaaniyadda dagmada waxaa go,aan ka gaarayo guddiga joogtada ah.

## CUTUBKA 5AAD: DAKHLIGA IYO KHARASHKA DAWLADDA HOOSE

### Qodobka 43aad: Hantida Dawladaha Hoose

Hantida Dawladaha Hoose waa hanti Qaran, waxaana loo isticmaali karaa ujeeddo Qaran iyo dan guud oo kaliya.

### Qodobka 44aad
### Ilaalinta Shuruucda Maamulka Maaliyada iyo Xisaabaadka

Dawladaha Hoose waxaa waajib ku ah dhowridda iyo ilaalinta Shuruucda Maamulka Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dawlad Gobaleedka Galmudug marka ay timaado arrimaha Maaliyadda iyo Xisaabaadka.

Keliya waxaa lacagaha canshuurta qaadi kara kuna shubi kara khasnadaha Dawladda hoose ee Dawlad Gobal eedka Galmudug Ciidanka dastuurka dalku u asteeyey inay shaqadaas qabtaan ee Minishiibiya, waana in ciidanka Minishiibiya dhammaan ka hawl galaan deegaannada Dawlad Gobal eedka Galmudug.

### Qodobka 45aad: Miisaaniyadda Dawladaha Hoose

1. Guddiga arrimaha Maaliyadda ee Golaha Deegaanka, isagoo kaashanaya Xoghayaha Dawlada Hoose, wuxa uu diyaarinayaa qoondeynta Miisaaniyad Sanadeedka Dawlada Hoose una gudbinayaa Golaha Deegaanka.

2. Golaha Deegaanka waa in uu go’aan ka gaaraa Miisaaniyad Sanadeedka loo soo gudbiyay ugu dambayn bisha Sebteembar, waxa ayna ku ansaxaysaa cod aqlabiyad oo konton boqolkiiba lagu daray hal (50%+1) ee tirada xubnaha guud ee Golaha kadib waxa ay u gudbinayaan gudoomiyaha Gobalka oo isaguna u gudbinaya Wasaarada.

3. Miisaaniyadu waxa ay ka koobnaanaysaa qoraal faahfaahinaya Miisaaniyadda, ku talagalka dakhliga iyo ku talagalka kharashka ee sannadka soo socda.

4. Miisaaniyaddu waa in ay yeelataa madaxyo iyo madax xigeeno qeexaya dakhliga iyo kharashka.

5. Golaha Deegaanka wuxa uu dib u-eegis ku samayn karaa Miisaaniyadda dawladda hoose lixda bilood dambe ee sanadka hadii dakhli dheeraad yimaado.

6. Dhakhliga dheeraadka ah waxaa lagu bixinayaa oo kaliya mashaariicda horumarineed ee degmada.

7. Golaha Deegaanka, marka ay timaado baahi, wuxa uu samayn karaa kala wareejin lacageed ee madaxyada iyo madax xigeenka Miisaaniyadda, waxaana ansixinaya Wasiirka.

8. Golaha Deegaanka kuma samayn karo kala wareejin madaxyada iyo madax xigeenadda khuseeya mashaariicda horumarineed.

9. Haddii Golaha Deegaanka uu anixin waayo Miisaaniyad Sanadeedka ugu dambayn 30ka Sebteembar ee Sanad Maaliyadeedka Golaha; Goluhu wuxa uu oggolaanayaa bixinta kharashka ku xusan Miisaaniyadda la soojeediyay laba iyo toban meelood meel (1/12) bishiiba isagoo ku xisaab qaadanaya Miisaaniyadii sanadkii hore la ansixiyay.

**Qodobka 46aad: Xisaab xirka Dawladaha Hoose**

1. Dawladda Hoose waa in diyaarisaa oo kaydisaa Xisaab Maaliyadeed ku saabsan dhammaan dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee lagu fulinayo hawlaha iyo shaqooyinka Dawladda Hoose.
2. Golaha Deegaanka waa in uu u diyaariyaa xisaab xirka Maaliyadeed ee Dawladda hoose sanad kasta ugu dambayn 1da Janaayo ee Sanad Kasta. Xisaab xirka Maaliyadeed waa in uu ka koobnaadaa Xisaabaadka iyo xogta lagama maarmaanka u ah in si cad u soo bandhigto habka loo maareeyay Miisaaniyad Sanadeedka, isbarbardhiga Miisaaniyadda la qoondeeyay iyo dhaqaalaha la helay iyo kharashka la bixiyay iyo xog kasta oo kale oo qayb ka noqon karta in la cadeeyo sida loo maareeyay loona maamulay Miisaaniyadda.

**Qodobka 47aad: Dakhliga Dawladaha Hoose**

Dakhliga Dawladaha hoose wuxa uu ka koobnaanayaa kana imaanayaa ilaha soo socda:

**1** Canshuuraadka iyo Xuquuqda hoos ku dhigan:

a. Canshuurta guryaha, carshaanta, baraakooyinka iyo dhismayaasha kale;

b. Canshuurta iibka iyo kalagadashada xoolaha;

t. Canshuurta shatiyada ganacsiga, malcamahada iyo calaamadaha ganacsiga haddii uusan si kale sharci kale u dhigin;

j. Canshuurta maaweeladda;

x. Canshuurta beeraha;

kh. Canshuurta Boorarka Xayaysiinta Ganacsiyada;

d. Canshuurta qiimaha guryaha;

r. Canshuurta qiimaha dhulka;

s. Canshuurta ruqsada dhul bixinta, fasaxa dhismayaasha iyo dib u hagaajintooda;

sh. Canshuurta suuqa badeecadaha iyo Qaadka;

dh. Canshuurta Gowraca iyo Kawaanka;

c. Canshuurta wax soosaarka gudaha;

g. Canshuurta hargaha iyo saamaha;

f. Canshuurta shirkadaha korontada;

q. Canshuurta dad dhigidda, dhalashada, aqoonsiga, sugitaanka asluubta, qoyska iyo degsiimada;

k. Canshuurta Shatiyada Warshadaha iyo Shirkadaha;

l. Xuquuqda gaadiidka dadweynaha;

m. Xuquuqda qaadida qashinka;

n. Xuquuqda biyaha laga dhaansado barkadaha;

w. Xuquuqda guryaha dadweynaha loo dhiso; iyo

g. Canshuuraadka iyo xuquuqda kale oo ay u oggolaadaan Shuruucda kale

y. Dawlad Gobaleedka Galmudug Soomaaliya.

2. Faa'iidada ka soo baxda ganacsiga ay dawladda hoose samayso si waafaqsan Sharcigaan ama Sharciyada heer Federaal ama Heer Dawlad Gobal leed.

3. Dakhliga ka soo gala il dhaqaale oo ay dawladda hoose leedahay ama dakhli ka soo galay adeeg ay dadweynaha u qabato.

4. Ganaaxyada ka yimaada jebinta Sharcigaan iyo Xeerar kale ee Dawladaha Hoose

5. Deeqaha ay ka helaan dawladda dhexe ee Federaalka, Dawlad Gobal eedyada, Dawlad Hoose, Hay'adaha Maxaliga ah iyo kuwa Caalamiga ah iyo dhinac kasta oo kale uu Sharcigu ogolyahay.

## Qodobka 48aad: Habraaca Canshuuraha iyo Xuquuqaha

1. Golaha Deegaanka wuxa uu Jaan-goynayaa Canshuuraha iyo xuquuqda kale isaga oo soo saaraya xeerar dawladda hoose kuwaasi oo qeexaya arrimaha soo socda:
   a. Caddadka canshuurta, xuquuqda iyo ganaaxaba illaa iyo inta uu u oggolyahay sharciga iyo
   b. Taariikhda ay waajib noqonayso bixinta canshuurta, xuquuqda iyo ganaaxa.
2. Marka la Xadidayo ama la dejinayo xeerarka Canshuuraadka iyo Xuquuqda waa in la dhowraa Shuruudaha soo socda:
   a. Dejinta Canshuurta ama Xuquuq kale waa in ay noqotaa mid maangal ah laguna saleeyay awoodda canshuur bixiyaha;
   b. Inaan aruurinta canshuurta loo igman karin Shakhsi ama shirkad gaar ah oo aan ahayn qayb ka mid ah hay'addaha Dawladda Hoose; iyo

t. In cadadka canshuurta ama xuquuqda aysan noqon mid hanti furasho ah, xad dhaaf ah ama xadgudub hantiyadeed ah.

3. Dabagalka Ilaalinta iyo xaqiijinta dhaqangalka Shuruudaha ku xusan Faqradda 2aad ee Qodobkaan waxaa mas'uul ka ah Wasiirka.

4. Fulinta go,aamada golaha deegaanka waxaa ka horeeyo bandhigid iyo sharaxaad laga siiyo dad waynaha Dagmada
5. Xeerka uu Golaha Deegaanka soo saaro wuxa uu dhaqangalayaa marka uu saxiixo Wasiirku.

**Qodobka 49aad: Qabashada Dakhliga**

1. Dakhliga dawladda hoose waxaa lagu qabanayaa lacag caddaan ah oo shillin soomali ah (Sh. So), waxaa la jarayaa xaashida lacag qabashada iyada oo lagu caddeenayo dakhliga la qabtay cadadkiisa, qofka laga qabtay iyo cidda qabatay dakhliga.
2. Xaashida lacag qabashada waa in ay saxiixaan qofka qabtay iyo cidda laga qabtay dakhliga.

**Qodobka 50aad: Kharash bixinta**

1. Dawladaha Hoose waxa ay bixin karaan kharashka ku xusan miisaaniyadda kaasi oo noqon kara:
   a) kharashka loogu tala galay socodsiinta hawlaha caadiga ah;
   b) kharashka hirgelinta mashaariicda horumarinta ee Degmada; iyo
   t) kharash deeq iyo kaalmo ah.
2. Kharash kasta ee la bixinayo waa in loo sameeyaa xaashida lacag bixinta ee loogu talo galay oo ay ku lifaaqan yihiin dhammaan qoraallada caddeynaya tixraaca kharash bixinta, waana in ay saxiixaan dadka Sharcigu awood u siinayo iyo qofka lacagta qaadanaya.

**Qodobka 51aad: Baarista Miisaaniyadda Dawladaha Hoose**

Xafiiska Hanti dhowrka guud ee Dawlad Gobaleedka Galmudug, isagoo kaashanaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, wuxa uu baaris ku sameenayaa Maaraynta Miisaniyadda Dawladaha Hoose iyo Xisaab-celinteeda.

**Qodobka 52aad: Lunsasho Hantida Dawladda Hoose**

1. Marka laga reebo mas'uuliyadda ciqaabeed ee ka dhalan karta, qof kasta oo bixiya ama amra in la bixiyo kharash aan sharciga waafaqsanayn ama feejignaan la'aan darteed sabab u noqda maqnaasho hanti Dawladda Hoose leedahay waxaa khasab ku ah in uu soo celiyo kharashka la bixiyey ama hantida maqan.

2. Mas'uuliyadda soo celinta hantida ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan waxa ay ku dhacaysaa qofka bixiyey ama mas'uul ka ah maqnaashaheeda, haddii uusan amar qoran ka haysan Golaha Degaanka ama Guddiga. Haddii uu jiro amar qoran mas'uulyadda soo celinta waxa ay ku dhacaysa xubnaha Golaha Degaanka ama xubnaha Guddiga ee oggolaaday bixinta kharashka ama hantida ku baxday.

### Qodobka 53aad: Xaqiijinta soo celinta hantida

Soo celinta hantida la bixiyay ee ku xusan qodobka 47aad waxaa mas'uuliyadeeda leh Wasiirka muddo saddax (3) bilood gudahood.

## CUTUBKA 6AAD: HESHIISYADA DAWLADDA HOOSE

### Qodobka 54aad: Shuruudaha Gelidda Heshiisyada

1) Heshiisyada dawladda Hoose dhinac ka tahay waxaa saxiixaya Guddoomiyaha Golaha Degaanka, iyada oo Xoghayaha Dawladda Hoose goob joog uu ka yahay.
2) Dhammaan heshiisyada ay dhinac ka tahay Dawladda Hoose waa in la saaraa Shaabada Dawladda Hoose.
3) Xoghaya Dawladda Hoose ayaa mas'uul ka ah kaydinta iyo dhowridda heshiisyada ay dhinac ka tahay Dawladda Hoose.
4) Heshiisyada la sameeyo iyada oon la dhowrin Shuruudaha ku xusan faqradda 1aad ee Qodobkan waa waxba kama jiraan.

### Qodobka 55aad:Qandaraas bixinta Dawladdaha Hoose

1) Heshiisyada ku saabsan gadashada alaabta, qalabka, qabashada shaqo ama bixin adeeg lana xiriira hawlaha Dawldda Hoose waxaa oggolaanshaheeda leh guddiga joogtada ah haddii lacagta ku baxeysa aysan ka badneyn boqol milyan oo Shillin Soomaali ah (100,000,000.00 Sh. So)
2) Haddii ay qiimaha lacagtu ka badantahay inta lagu sheegay faqradda 1aad ee qodobkaan, waa in toban maalmood oo shaqo ah loo bandhigaa Dadweynaha, Iana faafiyaa, iyada oo qandaraaska lagu dhejinayo meelaha ay Dawladda Hoose ugu talo gashay wargelinta dadweynaha iyo meelaha la garto in ay ku habboon yihiin.
3) Araajida qandaraaska waxaa loo gudbinayaa Guddiga joogtada ah isagoo heshiiska guddoonsiinaya cidda la timaadda qiimo macquul ah iyada oo sababaha lagu guddoonsiiyay lagu diiwangeliyo hadal-qoraalka.

4) Qandaraas aanan loo marin bixintiisa habraaca ku xusan qodobkaan waa waxba kama jiraan.

### Qodobka 56aad: Ciqaabta jebinta Sharcigaan iyo go'aamadda Dawlada hoose

Qofka jebinaya qodobada Sharcigaan, xeer nidaamiye, guddoon golaha deegaanka ama Guddoomiyaha Golaha Deegaanka waxaa lagu ciqaabayaa saddax billood oo xarig ama ganaax lacageed oo u dhaxeeya Shan boqol oo kun (500,000.00 Sh.so) illaa Toban Milyan (10,000,000.00 Sh.so) ah ama labadaba.

### Qodobka 57aad: Xaaladda kala Guurka

Inta laga dhisayo Golaha Deegaanada, dhammaan Maamulladda ku meelgaarka ah ee Degmooyinka iyo Goballada Dawlad Gobaleedka Galmudug waxa ay ahaanayaan sii hayayaal si waafaqsan Sharcigaan.

### Qodobka 58aad: Xeer Nidaamiyaal lagu fulinayo Sharciga

Wasiirka wuxa uu soo saarayaa xeer nidaaamiyeyaal lagu fulinayo Sharcigaan sida Xeer nidaaminaya dhismaha Waaxyaha Dawladda Hoose iyo Guddi Hoosaadyada Golaha Deegaanka muddo lix (6) billood gudahood ah oo ka billaabanaysa marka Sharcigaan dhaqangalo.

### Qodobka 59aad: Dhaqangalka Sharciga

Sharcigaan waxa uu dhaqan gelayaa marka Golaha Baarlamaanka ansixiyo uuna saxiixo Madaxweynaha Dawlad Gobaleedka Galmudug laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlad Gobaleedka Galmudug ee Soomaaliya.